

**Jidhkaagu sida dabiiciga
buu ku wacan yahay**

Adiga oo keliya ayaa u talin kara

Cidna xaq uma leh in ay qof kale jidhkiisa wax ka jarto

www.nkvts.no

Buuggan waxa diyaariyey Rugta wadani-
ga ah ee aqoonta gacan-ka-hadalka iyo
istereska ka dhasha (NKVTS). Buug-
gan waxaa laga heli karaa boggayaga
internet-ka www.nkvts.no

Nuqul daabacan waxa laga dalban karaa
postnottak@nkvts.unirand.no ama tili-
foonka 22 59 55 00.

Qorshaha hawlgalka dawlada ee 2008-
2011 ee la xidhiidha naafaynta xubnaha
taranka ee haweenka ayaa NKVTS loo
diray in ay aasaasto hayad aqooneed oo
wadaniya oo ka hawlgasha naafaynta
xubnaha taranka ee haweenka. NKVTS
waxay sameynaysaa daraasado waxaanay
siinaysaa talooyin iyo aqoon-korodhsi
dadka mawduucan ka shaqeeyaa ama ku
hawlan

Farshaxan: Christine Istad iyo
Kari Gjæver Pedersen
Sawir-gacmeedka bogga 8-9:
Kari C. Toverud CMI (sawir-gacmeedle
caafimaad oo la aqoonsaday)
Sawir: Luth og co AS |iyo Lars Sørli

Jidhkaaga adaa iska leh

Cidna xaq uma leh in ay dhaawacdo jidhkaaga. Adaa iska leh, adigaana u talin kara. Markaad tahay sabi, ilmo yar ama dhalinyaro waxaad u baahan tahay in dadka waaweyn ee kugu hareeraysani fahmaan arintaas.

Gabdhaha qaar waxa qoyskooda kaga yimaada cadaadis ku saabsan in xubnahooda taranka wax laga bedelo si ay sharaf u yeeshaan. Hadii aad xaaladan ku sugan tahay ogow in sharciga Norway loo sameeyay inuu ku ilaaliyo.

Waxaad xaq u leedahay in lagaa ilaaliyo in dhaawac lagu gaadhsiiyo. Hadii jidhkaaga qayb la gooyo weligaa dib uma haysid.

Ogow markaad laftigaagu hooyo noqotid in gabadhaada jidhkeedu uu ku dhamays tiran yahay sidii loo abuuray. Xubnaheeda taranku waa qayb ka mid ah qaybaha jidhka oo loo baahan yahay si loogu noolaado nolol wanaagsan oo qiimo leh.

Ma u baahan tahay cid aad la hadashid? Ma u baahan tahay caawimo? Buuggan xagiisa danbe eeg.

Jidhku si dhamaystiran buu u abuuran yahay



Naafaynta xubinta taranku waa ku halis caafimaadka

Naafaynta xubnaha taranku waa dhaqan la caadaystay oo lagu bedelo iyada oo la goynaayo faruuryaha kore ee xubinta taranka ee gabdhaha. Inta la gooyaa aad ayey ku kala duwan tahay. Waxa caadiyan qalitaankan lagu sameeyaa gabdhaha da'doodu u dhaxayso 5-14 sano, waxaa sidoo kale lagu sameeyaa ilmaha yare ee sabiga ah.

Naafaynta xubnaha taranka waxay dad badani u yaqaanaan gudniin, sunayn ama ereyo kale. Naafaynta xubnaha taranka ee gabdhaha ama hablaha loo geystaa wuu ka balaadhan yahay waanu ka khatarsan yahay gudniinka wiilasha, labadan qalitaana la isma barbardhigi karo.

Norway dhamaan noocyada kala duwan ee gudniinku waa mamnuuc. Waa mamnuuc in la gooyo in yar iyo in waynba. Ma jirto sabab loo bedelo xubnaha taranka ee hablaha ama gabdhaha caafimaadka qaba. Naafaynta xubinta taranku caafimaadka waa ku halis. Dhaawac waara ayaa qofka soo gaadhi kara. Sidaa daraadeed waa ka mamnuuc wadamada aduunka badankooda. Norway kadib markii ay saxeexday heshiishyo caalami ah waxaa waajib ku noqday in ay dabar goyso dhaqamo halis ku ah caafimaadka. Waxaa intaa dheer iyada oo ay Norway leedahay sharci ka soo horjeeda naafaynta xubinta taranka ee hablaha. Ujeedada sharcigani waxaa weeye inuu hablaha Norway ku koraya ka ilaaliyo in aan lagula kicin fal noocan ah.

Waxaa ku adkaan karta dhallinyarada in ay mawduucan ka hadlaan sababtoo ah waa arin laga gaabsado ka hadalkeeda. Sidoo kale habalaha aan lagudin ayaa suaalo ka qabi kara dhaqankan. Waxaa dhici karta in ay ka werwersan yihiin walaalhood ama cid ay yaqaanaan oo markaasna ay u baahan yihiin aqoon dheeraad ah.

Buuggan waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan:

- naafaynta xubnaha taranka ama gudniinka.
- aragtida laga qabo naafaynta xubnaha taranka
- sida jidhku asal ahaan u sameysan yahay
- dhibaataada caafimaad ee ka iman karta naafaynta xubnaha taranka
- sharciga mamnuucaya naafaynta xubnaha taranka ee haweenka
- goobta aad ka heli karto caawimo



Photo: Lars Sorli

Aragtiyaha laga qabo naafaynta xubnaha taranka.

Dadka ku dhaqma guditaanka ama naafaynta xubnaha taranku siyaabo kala duwan ayey u sababeeyaan baahida keentay iyo waxa dhaqankan kelifay. Waxaynu halkan ku qaadaadhigaynaa fikradaha ugu xoogga weyn ee arrimaha la xidhiidha.

Gudniinku wuxuu gabadha ka ilaaliyaa in loo galmoodo.

Naafaynta xubnaha taranku meesha kama saaraso baahida galmada, waayo hamadu waxay ka timaadaa maskaxda iyo fikirka. Naafaynta xubnaha taranku ma joojinayso galmada guurka ka hor, gogoldhaafna kama hortagayso. Sidoo kale way fududahay inaan la samayn galmo ama gogoldhaaf gudniin la`an. Daacadnimada iyo is-xakamayntu waa wax qofka ku xidhan.

Gudniinku waa dhaqan sooyaal ah oo cid waliba sameeyso. Si aanay gabdhuhu u soocnaan ama loo takoorin waa in la guda.

Dadka dunida ku nool intooda badani kuma dhaqmaan naafaynta xubnaha taranka ee haweenka. Aqoonta loo yeeshay halista dhaqankan ayaa keentay in dad badani ka soo horjeestaan naafaynta xubnaha taranka, iyada oo ay ku jiraan bulshooyin caadadan hore ugu dhamqi jiray.

”Laakin in yar ayuun baynu jari karnaa“

Dad badan baa raba in ay inyar uun ka jaraan korka xubnaha taranka ee gabadha, taasoo loo yaqaan sunayn.

Xitaa hadii “in yar” uun la jaro dhaawacyo waaynweyn bay geysan kartaa. Sidaa daraadeed waa mamnuuuc in nooc kasta oo gudniinka ka mid ah la sameeyo. Maxaa wax looga jarayaa marka la ogyahay inuu dhaawac keenayo islamarkaana aan loo baahnahayn? Waalidiinta qaarkood ayaa ka dhiga in inyar la jaray iyadoo in badan la jaray. Kuwa dadka guda qaar baa jara kintirka iyo faruuryaha, iyagoo ku doodaya in ay “wax yar jareen”. Taas oo micnaheedu yahay in gabdhaha iyo waalidkood la siray oo gudniinku ka balaadhatay intii ay rabeen.

Gabdhaha aan gudnayn, lama guursado.

Rag badan oo ka yimid wadamada laga sameeyo gudniinka ayaa fahmay dhaawaca uu leyahay. Sidaa daraadeedna ma rabaan in xaaskooda gudniin lagu sameeyo. Gudniin la`aantu waxay yaranaysaa caafimaad darrada waxaanay kor u qaadeysaa xiisaha iyo tayada raaxda dhexdooda. Waa in la ixtiraamaa gabdhaha iydoon loo eegin in la guday iyi in kale.

Diinta ayaa faraysa gudniinka

Ma jirto diin amraysa in haweenka la

gudo. Waxayse diimo badani sheegayaan inaan la dhaawacin abuurta. Jidhkaaguna abuurta ayuu ka mid yahay. Muslimiinta qaar ayaa sheegaya in diinta islaamku taageerayso gudniinka gabdhaha. Laakiin muslimiinta badankoodu kuma dhaqmaan gudniinka.

Waa muhiim in la raaco rabitaanka iyo dhaqanka waalidka.


Dhaqamada halista ah waa in lala dagaalamo. Gudniinku waa halis waana mamnuuc sharciyan. Hadii ay waalidkaagu rabaan in ay ku gudaan, xitaa haddii ay tahay jacayl dartii, waxaad xaq u leedahay in aad diido. Waa lagaa caawin karaa sidii aad u diidi lahayd, meeshii aad la soo xidhiidhi lahaydna ka eeg buuggan xagiisa danbe.



Qaabka jidhka loo abuuray

Xubinta taranka ee haweenka ee dabiiciga ah

Looma baahna in la xidho xubinta taranka ee haweenka waayo dabiiciyan ayeey u xidhan tahay. Xubnaha taranka ee haweenku shaqooyin gaar ah ayeey qabtaan, jidhkuna wuxuu u dhisan yahay siduu u ilaalin lahaa. Naafaynta xubnta taranku waxay wiiqaysaa awoodii uu jidhku u lahaa qabashada hawlahaas.



Waxaa qumaati loo arkikaraa oo keliya kintirka, afka xubinta taranka iyo afka dhuunta kaadimareenka marka dhinac loo leexiyo faruuryahaha.aside.

Kintir

Xubin neerfeyaal badan leh oo dardar gelisa galmada, inteeda badnina ku qarsoontahay jidhka xaggiisa hoose. Madaxiisa oo keliya ayaa dibeda laga arkaa waxaanu leeg yahay xabad digir ah badhkeed.

Afka dhuunta kaadi mareenka

Afka dhuunta kaadimareenka, wuxuu ku yaalaa afka hore ee xubinta taranka.

Faruuryaha xubinta taranka ee hoose

Waxay daboolaan oo ilaalinayaan afka xubinta taranka iyo dhuunta kaadi mareenka.

Afka xubinta taranka

Waa xubin kala baxda oo isku soo noqota sida cinjirka oo kale, tusaale ahaan xilliga dhalmada.

Maqaarka kore

Wuxuu daboolaa islamarkana ilaaliyaa kintirka

Faruuryaha kore

Waxay ilaalin dheeraad ah siiyaan faruuryaha hoose iyo qaybo kale. Sida caadiga ah afka xubinta taranka iyo afka dhuunta kaadi mareenka waxa daboolaa faruuryaha kore iyo kuwa hoose.

Xuubka bikrada


Xuubka khafiika ah oo ka hooseya faruuryaha wuxuuna u furanyahay dhuunta xubinta taranka. Xuubkaasi wuxuu sida caadiga ah u furan yahay caadada, wax dhaawac ama burbur ahina kuma soo gaadhaan galamda koobaad.

Noocyada naafaynta xubnaha taranka ama gudniinka

Sidan ayuu u kala qaybiyey Ururka Caafimaadka Aduunka (WHO). Run ahaantii waxaa dhacda in aan lakala saari karin noocyada kala duwan ee naafaynta xubnaha taranka ee haweenka.


Nooca 1-aad: Madaxa kintirka oo dhamaan ama qayb la jaro (klitoridektomi). In la ogaado ama la arkaa way adkaan kartaa.

Nooca 2-aad: Madaxa kintirka iyo faruuryaha xubinta taranka ee gudaha oo dhamaan ama qayb la jaro (eksisjon).



Nooca 2-aad

Nooca 3-aad: Yaraynta afka xubinta taranka. Qaybo ka mid ah faruuryaha hoose iyo kuwa kore oo la jaro, la isu keeno oo la tolo si uu u samaysmo cad daboolka afka xubinta taranka. Sida badan waxa kaloo la jaraa qayb ka mid ah madaxa kintirka (infibulasjon).



Nooca 3-aad

Nooca 4-aad: Qaalitaanada kale ee halista ah ee lagu sameeyo xubinta taranka haweenka kuwaas oo aan loo sameyn sabab caafimaad sida: mudid, daloolin, jarid, xoqid ama gubid.

Raadadka caafimaad darro

In naafaynta xubnaha taranka reebto raadad caafimaad darro waxay ku xidhan tahay nooca guditaanka, da`da gabadha, habka iyo xaalada nadaafadeed ee goobta lagu fuliyay qalitaanka. Aragtida qoyska, bulshada iyo deegaanka uu qofku ku nool yahay iyguna saamaayn ayay ku yeelanayaan. Qalitaanka lagu sameeyo dhakhtar iyo midka loo fuliyo habdhaqameedka labduba waxay keeni karaan dhibaatooyin iskudhafan. Dhibaatooyinka isku dhafan qaarkood waa degdeg, qaarkoodna wakhti dheer bay qaadankaraan.

Dhibaatooyin isku dhafan oo degdega ah

- Xanuun xad dhaaf ah
- Nabar iyo barar malax leh
- Dhiigbax nafta halis ku noqon kara
- Kaadida oo istaagta kadib dhaawac iyo barar soo gaadhay dhuunta kaadi mareenka
- Infakshan nafta halis ku noqon kara
- Jab iyo dhaawacyo kale ayaa iman kara marka gudniinka la samynayo waayo waa in inanta xoog lagu hayo xanuun daraadii.



Dhibaatooyin isku dhafan oo qotodheer

- Xanuun iyo kaar joogto ah oo ku yimaada macdanta/hoosta
- Xanuun iyo maqaarka oo isku gijjisma ayaa ka hor iman kara dhaqdhaqaaqa waxaana adkaan kara in ciyaaro fudud la sameeyo.
- Xanuun iyo dhibaato la xidhiidha caadada iyo dhiiga caadada oo ku urura agagaarka xubinta taranka (nooca fircooniga)
- Xanuun iyo dhibaatooyin la xidhiidha kaadida oo wakhti dheer qaata. Kaadida oo la xejisan kari waayo iyo infakshan kaadimareenka ku dhaca oo soo noqnoqda.
- Finan samaeeya nabaro biyo leh (cyster).
- Xubinta taranka iyo dhuunta kaadi mareenka ama xubinta taranka iyo malawadka oo isu furma oo keena in saxarada ama kaadidu soo da'do. (Fitsler)
- Guditaanku wuxuu keeni karaa dareenka jidhka oo yaraada ama bata iyo xanuun xilliga galmada.
- Uuraysiga oo adkaada, suuragalnimo in uur ku samaysmo dibeda ilmogaleenka iyo madhalaysnimo (infertilitet)
- Dhibaatooyin isku dhafan oo iman kara xilliyada uurka iyo dhalmada. Marmaka qaarkoodna waxaa dhacda in hooyada iyo limuhuba dhintaan.
- Dhaawac soo gaadha kalsoonida waalidka ama cida carruurta masuulka waayo waxaa qofka lagu qasbay wax aanu doonayn ama diyaar u ahayn.
- Mustaqbalka waxa iman kara arrimo ku soo xasuusin kara gudniinkii ilsla markaasna keeni kara cabsi. Dadka qaar tani waxay ku dhacdaa xilliga galmada, foosha ama la kulanka dhakhtarka haweenka.

Taariikhda iyo baahsanaanta gudniinka

Cidna si rasmi ah uma oga sababta keentay in wax laga jaro xubnaha taranka ee haweenka. Waxaase la ogayahy in dhaqankani in dhaqankani soo jiray kumanaan sanandood ka hor diimaha masiixiga iyo islaamkaba.

Naafaynta xubnaha taranka waxa ku dhaqma muslimiin, masiixiyiin iyo iyo dad aaminsan diimo kale. Muslimiinta iyo masiixiyiinta dunida ku nool badankoodu naafaynta xubnaha taranka kuma sameeyaan gabdhohooda.

Ma jirto diin faraysa naafaynta xubnaha taranka in gabdhaha lagu sameeyo.

Dadka ku dhaqma naafaynta xubnaha taranka ee haweenku muddo dheer bay soo wadeen caadadan waxaanu ka mid noqday dhaqankooda. Bulshooyinka qaar baa u adeegsada gudniinka sidii loo xakameeyn lahaa galmada haweenka. Aqoon darro awgeed, oo siiba loo leeyahay dhibaatooyinka caafimaad, ayaa u sabab ah in weli lagu dhaqmo gudniinka. Waa dhaqan soo jireen ah, waxaana si badan caddaadis saara in la fulyo bulshada iyo deegaanka.

Dhaqankani wuxuu ku fidsan yahay qaybo ka mid ah qaarada Afrika, laakin waxaa kaloo ku dhaqma qoomiyado ku nool Bariga Dhexe iyo wadamada Indoneesiya, Malaysiya iyo Hindiya.

Ururka caafimaadka aduunka (WHO), ayaa qisaasay inay adduunyada ku nool yihiin haween ama dumar lagu qiyaasay boqol iyo sodon malyuun ilaa boqol afratan malyuun (130-140) oo la guday waxay kale oo warbixintani intaa ku darysaa in sanad walba la gudo saddex 3 malyuun oo haween ah. Boqolkiiba 90 % haweenkaas ka mid ayaa loo guda noocyada 1-aad, 2-aad iyo 4-aad, halka boqolkiiba 10% looga gudo nooca 3-aad. Guditaanada ka dhaca Norway waxaa u badan nooca 3-aad taas oo ay keentay in daka ajenebiga ah ee dhaqankan isticmaala degna Norway ay badankodu ka yimaadeen wadamada lagaga dhaqmo nooca saddexaad.



Khariidadan aduunku waxay muujinaysaa baahsanaanta gudniinka haweenka. Dalalka gudniinka haweenku ka hooseeyo boqolkiiba 20 % laguma soo darin khariidadan.

- Waxa uu gaadhay boqolkiiba 20-49 % haweenka
- Waxa uu gaadhay boqolkiiba 50-79 % haweenka
- Waxa uu gaadhay in ka badan boqolkiiba 80 % haweenka



Sharciga

Sharciga mamnuucaya naafaynta xubnaha taranka ee haweenka oo dhaqan galay 1996, waxa uu madnuucayaa naafaynta xubnaha taranka ee haweenka nooc walba. Sharcigu wuxu ka kooban yahay laba qaybood, mid mamnuucid ah iyo mid waajib ka hortag ah. Sharciga mamnuucida naafaynta xubnaha taranka ee haweenka wuxuu khuseeyaa gudaha iyo debada Noorway. Sharcigan ujeedadiisu waxaa weeye inuu hablaha ka ilaaliyo in naafaynta xubnaha taranka ama gudniin lagu sameeyo.

Mamnuucida

Hadii lagu gudo adoo Norway jooga oo waalidkaagu joojin karayeen, waxay waalidkaagu sameeyeen xadgudub sharci. Qofka fuliya gudniinka iyo kuwa ka qaybqaataba waa la ciqaabi karaa. Taas micnaheedu waxa weeye waalidka ama cid kale kuuma geyn karto qof ku guda, ha joogo Norway ama dibedaba. Xitaa hadii aad adigu ogoshay in lagu gudo.

§1

Qofkii si kas wax ugu sameeya xubinta taranka ee haweenay, taas oo u geysta dhaawac xubinteeda taranka, ama keenta isbedel waara waxa lagu ciqaabayaa inuu geystay naafaynta xubnaha taranka ee haweenka. Ciqaabtu waa saddex (3) sanadood oo xabsi ama jeel, laakiin ilaa lix (6) sanadood hadii uu dhawaacu keeno jirro ama hawlgabnimo shaqo oo ka badan laba (2) todobaad, ama qoon aan la dawayn karin, khalad ama dhawaac yimaado, iyo ilaa sideed sanadood (8) hadii dhaawacu keeno dhimasho ama dhaawac laxaad leh oo jidh ahaaneed ama caafimaad. Cidii ka qaybqaadatana sidaas oo kale ayaa loo ciqaabayaa. In dib loo qodbo haweenay la furay sida la soo sheegay baa loo ciqaabayaa. (Sharciga mamnuucida naafaynta xubnaha taranka ee haweenka).

Hadii aad la degan tahay cid aan ahayn waalidkaaga, waxa dhici karta in ay masuuliyad iska saaraan in ay ku gudaan. Waxay rabaan inay wixii ay isla haayeen waa la idinka sugaayaa fuliyaan. Markaa waxa muhiim ah in aad ka feejignaatiid in naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagugu sameeyo xitaa hadii aad la degantahay ayeeyo, awoowe, adeero, eedo ama cid kale adoo fasax ku jooga wadanka adiga ama waalidkaa ka soo jeedo asal ahaan. Sharcigu wuxuu kale oo mamnuucayaa in lagu celiyo gudniinkii markale. Taasoo micneheedu yaahay in aan la ogeleyn in dib loo tolo haweenay hore u tolnayd oo la furay xilligii umusha.



Wajibka ka hortaga

Wajibka ka hortagu wuxuu farayaa qaybo ka mid ah shaqaalaha dawlada iyo kuwa rayidkaba inay isku dayaan inay joojiyaan inta aan la fulin gudniinka haweenka.

Markay helaan xog ku saabsan in cid lagu sameynayo naafaynta xubnaha taranka ee haweenka wuxuu sharcigu waajib kaga dhigayaa in ay joojiyaan in gudniinku dhaco, tusaale ahaan iyagoo wargelinaya waaxda ilaalinta caruurta (barnevern) ama booliska. Waajibkan ayaa ka hor maraya waajibka sir qarinta.

§2

Waxa ganaax lacageed ama xabsi ah ilaa hal (1) sano lagu ciqaabayaa shaqaalaha ka shaqeeya goobaha kala duwann ee kala ah; xanaanada caruurta (barnehage), hay'ada ilaalinta caruurta (barnevernstjenesten), hay'ada adeega caafimaadka iyo bulshada (helse-og sosialtjenesten), dugsiyada ama iskuulada, rugta caruurta lagu hayo iskuulka ka dib (SFO) iyo ururda diimaha, hadii ay iska indhatiraan oo aanay dacwayn ama si kaleba uga hortagin naafaynta xubnaha taranka ee haweenka, waxaa loo cuslanayaa qodobka koobaad § 1. Tani waxay kaloo khusaysaa hogaamiyeyaasha dimaha iyo afhayeenadooda. Waajibka ka hortagu wuu ka hormaraya waajibka sir qarinta. Iska indhatirida ciqaab laguma mutaysanayo hadii aan la fulin naafaynta xubnaha taranka ama aanay isku dayidu ahayn mid ciqaab lagu mutaysan karo. (Sharciga mamnuucida naafaynta xubnaha taranka ee haweenka).

Ciqaab baa lagu mutaysanayaa ka qaybqaadashada in cid naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyo, ama la iska indhatiro oon laga hortegin, laakiin denbi ma leh qofkii naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyaa.

Wajibka wargelinta

Naafaynta xubnaha taranka ee haweenku waa dayacid daryeel oo aad u weyn. Shaqaalaha dawlada iyo kuwa rayidka ahba waajibka ka hortaga waxa u dheeraan kara waajib ah in ay hay'ada ilaalinta caruurta (barnevern) wargeliyaan haddii ay ka war helaan dayacid daryeel caaruureed. Waxa dhici karta in aad adigu halis ugu jirtid in naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagugu sameeyo ama walaalahaa halis ugu jiraan in naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyo ama adiga ama walaalahaa dhibaato caafimaad idin hayso laakiin aydaan helin caawimadii aad u baahnaydeen.

Fursad wadahalad iyo baadhitaan xubinta taranka oo aan khasab ahayn

Laga bilaabo dayrta 2009 waxa qaar ka mid ah degmooyinka wadanku fidinayaan fursad ah baadhitaan xubinta taranka. Fursadan waxa loo fidinayaa dhamaan hablaha iyo dumarka asal ahaan ka soo jeeda goobaha boqolkiiba 30 iyo wixii ka badan, uu ka jiro naafaynta xubnaha taranka ee haweenku. Qof waliba wuxuu fursadan helayaa sanad gudahii ka dib marka uu Norway yimaado.

Waalidka ka yimaadaa wadamada uu ka jiro dhaqanka naafaynta xubinta taranku waxa la siinayaa fursad wadahalad oo ku saabsan naafaynta xubnaha taranka ee haweenka markay gabadhu dugsiga ama iskuulka bilaabayso iyo markay fasalka shanaad gaadho, waxa kale oo fursad loo siinayaa in gabadha xubinteeda taranka baadhitaan lagu sameeyo.

Dugsiga dhexe waxa hablaha ay khasayso iyaga fursad loo siinayaa wadahalad iyo baadhitaan xubinta taranka ah oo aan khasab ayan.

Intaan baadhitaanka la fulin waa in waalidka ama gabadhu ogolaansho qoraal ah bixiyaan oo ku saabsan in la baadhi karo. Fursada wadahaladka iyo baadhitaanka xubinta taranka waxaa loo qorsheeyay in wadanka oo dhan la gaadhsiiyo sanadka 2010.



Naafaynta xubnaha taranku waa wax dadka badankoodu qarsadaan. Way dhici kartaa in habluhu qabaan su'aalo ay ka cabsanayaan in ay weydiiyaan dadka ay garanayaan. Waxa markaa mudan in aad ogaatid in kalkaaliyaasha caafimaadka iyo dhakhaatiirtu aqoon badan u leeyihiin isla markaasna uu saaran yahay waajib sir qarineed. Ururada samofalka iyo hay'adaha dawliga ah ayaa ku caawin kara hadii aad ka cabsanaysid in naafaynta xubnaha taranka ee haweenka lagu sameeyo. Su'aalahaaga ayaa lagaaga jawaabi karaa si qarsoodi ah.

Halkan ayaad caawimo ka heli kartaa

- Kaalkaaliyaha caafimaad ama macalinka bulshada ee dugsiga ama degmada aad degan tahay.
- Dhakhtarkaaga joogtada ah ama dhakhtar kale
- Tilifoonka Laanqayrta Cas (Røde Kors), 815 55 201. Waxad u soo wici kartaa si qarsoodi ah.
- Hay'ada ilaalinat caruurta ee degmadaada (barnvrn)
- Booliska, soo wac 02800.

Boggaga internetka ee aad warbixin ka heli kartid

www.ung.no

www.seif.no

www.nkvts.no

Waaxaha caafimaadka gobolada: Gobol waliba waxa uu leeyahay qaybta caafimaadka haweenka oo si gaar ah u qaabilsan inuu ka shaqeeyo hablaha iyo dumarka naafaynta xubnaha taranka loo geystay. Waxa jira fursado wadahadal, baadhitaan, daaweyn iyo dib u furid hadii loo baahdo. Toos baa loola xidhiidhi karaa ama waxa ku soo gudbin kara dhakhtar, kalkaalisoo caafimaad ama umuliso. Dhamaantood waxa saaran waajib sir qarinnaya waxaanay kaaga jawaabi karaan su'aalahaaga.

Universitetssykehuset i Nord-Norge (UNN), Tromsø, La xidhiidh qaybta bukaan socodka haweenka ama dhalmada iyoo qaybta ummulaha, tel 77 62 60 00.

Haukeland Universitetssykehus, Bergen. La xidhiidh qaybta haweenka (kvinne-klinikken) adoo wacaya, tel 05300.

St. Olavs Hospital, Trondheim. La xidhiidh qaybta haweenka (kvinne-klinikken), tel 72 57 12 12.

Stavanger Universitetssykehus (SUS). La xidhiidh qaybta haweenka (kvinne-klinikken), tel 05151.

Oslo Universitetssykehus Ullevål, La xidhiidh qaybta haweenka (kvinne-klinikken), tel 22 11 98 44, Sara Kahsay tel 938 98 903.

Oslo Universitetssykehus Rikshospitalet, La xidhiidh qaybta haweenka (kvinne-klinikken), tel 23 07 00 00.

**Ka caawi ilmaha siduu naftiisa
ugu talin lahaa**





Jidhkaaga adigaa iska leh